



Ku saabsan Studieförbundet

Ururada Bulshada Waxbarashadu (studieförbundet) waxay bilaabeen hawshooda muddo hadda laga joogo 100 sano. Waxaa bilaabay dad markaas rabay inay bulshada wax ka bedelaan. Maanta waxaa shaqeeya 10 Urur Bulsho Waxbarasho (studieförbundet) oo mid kastaa dadka baro waxyaalo kala duwan. Ururada dhamaantood waxaa maalgeliya dawlada, gobolka iyo degmada. Kobcinta Aqoonta Bulshada (folkbildning) waa dhaqaale loogu talo galay in lagu abuuru aqoon cusub oo dadka da'doodu ka weyntahay 13 jir isla wadaagaan.

Studieförbundet waxay ka mid tahay Ururada Bulshada Waxbarashada (studieförbundet) kuwa ugu weyn. Waxay gacanta ku haysaa Dugsiyo Waxbarasho (studiecirkel), waxbarashooyin kale, bandhigyo dhaqan iyo qudbado waxbarasho. Studieförbundet way ka madaxbanaantahay ururada siyaasada iyo diimaha. Waxay caawisaa kumanaan Dugsiyo Waxbarasho (studiecirkel) iyo ururo, Iswiidhan oo dhan. Waxaan ku caanbaxnay waxbarashada Sayniska, Xoolaha, Deegaanka iyo Dhaqanka. Waxaan ku dadaalnaa sidii waxbarashadu u horseedi lahayd horumar wax ku ool ah.

In wax la isla barto aadbay u fiicantahay

Tan ugu muhiimsan ee Studieförbundet ay rabto waa in dadku wax isla bartaan, horumar sameeyaan, iyagoo aad ugu faraxsan waxbarashada.

Na la soo xiriir si aad u hesho warbixin dheeraad ah.

studieframjandet.se

Studie
främjandet

Somaliska



Dugsi Waxbarasho

Qaab wax loo wada barto oo aad u fiican

Studie
främjandet

Furo Dugsi Waxbarasho (studiecirkel) — si fudud!

Ma rabtaa inaad wax baratid, adiga iyo saaxiibadaa ama ururka aad ka tirsantahay?

Waxaad furan kartaa Dugsi Waxbarasho (studiecirkel) adigoo kaashanaya Studieförbundet oo diyaar kuula ah taageero buuxda. Dugsiyada Waxbarashada (studiecirkel) waa qaab gaar ah oo waxbarasho oo leh taariikh dheer. Waa qaab waxbarasho oo aad u fuduf laakiin maskax ku dhisan oo faa'iidado badan leh: Dad yar oo ka siman xiisaha wax gaar ah ayaa furan kara Dugsi Waxbarasho (studiecirkel). Qaab wada tashi ah ayay dadka waxbarashada ka qeybqaadanaya u diyaariyaan waxa la baranayo iyo qaabka wax loo baranayo.

Hadii aad hadda ogtahay waxaad rabtid inaad baratid la xiriir Studieförbundet taala meesha aad degentahay. Waxa lagaa caawin doonaa soo diyaarinta qorshadaha waxbarashada. Hadii aad rabtid in lagu siiyo talooyin la xiriir waxbarashada aad rabtid waxa lagugu caawinayaa talooyin iyo taageero. Hadii aad fikradda waxbarashada kali ku tahay waxa lagaa caawinayaa sidaad dad kale oo wax kula barta u heli lahayd. Go'aanka iyo fikradda adigaa iska leh, Studieförbundet waxay kuula diyaartahay taageero buuxda.

Furashada Dugsi Waxbarasho (studiecirkel) way fududahay, Studieförbundet dadka wax lacag ah kama qaado. Waxbarashadu waxay ku saabsanaan kartaa wax kasta oo qofku rabo. Waxaan soo dhaweynaa fikradaha cusub, waxaan dadka ku caawinaa qalabka iyo rugta wax lagu baranayo iyo waliba habka Internet-ka wax loogu barto. Studieförbundet waxay kuu haysaa aqoon iyo waayo aragnimo waxbarasho, gaar ahaan qeybaha aan ku caanbaxnay sida Sayniska, Xoolaha, Deegaanka iyo Dhaqanka.

Studieförbundet boggeeda Internetka www.studieförbundet.se ka akhriso war dheeraad ah oo ku saabsan qaabka waxbarashada. Waxaad arki doontaa wax ku caawiya oo ku dhiirogeliya.



Dugsi Waxbarasho (studiecirkel-ka)

- Dadka ka qeybqaadanayaa ugu yaraan waa 3 qof oo ugu yaraan kulma 3 jeer
- Waxbarashadu waxay noqon kartaa wax kasta. Waxa la baranayo idinkaa go'aamindoona
- Waxa lagu kulmayaa rug waxbarasho, Internetka ama labada oo wada socda

Studieförbundet way ku taageeraysaa

Waxaan diyaar u nahay inaan ku taageerno hadii adiga ama ururkaagu rabo inuu jeediyo qudbad, sameeyo bandhig, filim ama muusik (dans). Inta badan waxaan idinka caawineynaa rugta wax lagu baranayo, qalabka iyo ogeysiinta.

